# Amaahsashada waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado

**Waxa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado waxaa laga amaahday Maamulka Gobolka Västmanland.**

Waa mamnuuc in waxa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado in qof kale la siiyo, waayo waxaa gaar ahaan loogu talagalay qofka la amaahiyay kaddib markii baahidiisa laga arrinsaday.

## Sida loo daryeelo waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado

Waxa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado waa in loo daryeelo loona nadiifiyo, hab waafaqsan tilmaan-bixinta la siiyay kuna qoran buugga tilmaanta hab-isticmaalista. Sidoo kale waxa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado, waa in hab sugan meel lagu kaydsho oona laga ilaaliyo waxyeelid. Waa mamnuuc in la rinjiyeeyo, ama in qaab-dhismeedkiisa waxa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado in wax laga beddelo.

Adeegga iyo hagaajnta wuxuu xilsaaran yahay maamulka. Haddii waxa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado u baahan yahay dayactir waa in loola xiriiro Xarunta waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado *Hjälpmedelscentrum* – qofku wuxuu isticmaali karaa adeegga farsamada elektroonika ku salaysan ee barta internetka *1177.se/hjalpmedel-vastmanland* ama waco Miiska deegga macaamiisha 021-17 30 48.

Haddii taxadardarro awgeed ama u lummo waxa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado, waxaa qofka waajib ku ah in u bixiyo kharashka qiimahiisa. Sidaas darteed, qofku waa in u hubsado in u lee yahay caymiska guryaha.

## Haddii wax dhacaan

Haddii waxa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado la xado, waa in daahid la`aan ciidan booliska la wargeliyo, sidoo kale waa in u Xarunta waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado *Hjälpmedelscentrum*. Haddii shil xiriir la leh waxa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado u dhaco waa in u wargeliyo Xarunta waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado *Hjälpmedelscentrum* ama u wargeliyo maamulka goobta walxaha laga soo qaatay.

## Markii qofku u sidii berri hore oo kale u baahnayn waxa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado waa in u dib u soo celiyo

Markii qofku u sidii berri hore oo kale u baahnayn waxa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado waa in u dib u soo celiyo. Waa in soo celinta kahor u si fiican u soo nadiifiyaa.

Goobaha dib loogu soo celin karo waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado waxaa kamid ah:

- Xarumaha daryeel-caafimaadeedka ee gobolka ku yaalaan
- Xarunta baxnaaniska *Habiliteringscentrum*
- Xarunta Waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado *Hjälpmedelscentrum*
- Goobta qofka laga siiyay waxa/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado

Saacadaha ay furan yihiin waxay ku qoran yihiin barta internetka 1177.se.

## Warbixin dheeraad

Warbixin dheeraad oo ku saabsan amaahsashada waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado, waxaa laga aqrisan karaa barta internet *1177.se/ hjalpmedel-vastmanland* hoosta halka ay ereyadaan ku qoran yihiin *Det här kan du få hjälp med*.

Hjälpmedelscentrum, Signalistgatan 2, Västerås.

Miiska deegga macaamiisha: 021-17 30 48

Wuxuu furan yahay Isniin-khamiis, saacadaha 8–16.30, jimco 8–16

(Saacadaha 7-8 waxaa looga talagalay oo keliya ka qaadashada iyo dib u soo celinta waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado) Xilliyada kuleelaha, toddobaadyada 25-33, wuxuuu Miiska deegga macaamiisha wuxuu furan yahay isniin-jimce 8-16